

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

الحمد لله رب العالمين والصلاة والسلام على نبيه الأمين وعلى آله وصحبه أجمعين
أما بعد:

Waxaan u mahad celinayaa Sh xasaan xuseen sida uu isugu dayay inuu jawaab ka bixiyo su'aalahaygii, qoraalkiisiina waan akhriyay, kumase arag jawaabihii aan kasugayay, wax yar mooyee.

Wuxuuse soo adkeeyay wax horay uu usheegay oo ahaa inuu jamaacada ictisaam gaalaysiiyay, arinkaana su'aali kama taagnayn oo waa war horay loo oгаа, hasa yeeshee su'aasha muhiimka ahi waxay ahayd inuu isku meel galiyo ictisaam iyo culimada ay mawqif kan ka soo qaateen, oo uu wada gaaleeyo ama u wada cudurdaaro, laakiin qolada ictisaamka uma uusan cudurdaarin culimada ay ka soo qaateense wuu u cudurdaaray!!, si xeeladi ku jirto waana soo faahfahin doonaa ilaahay idankii, waxaa kale oo iyana meesha ka baxay su,aalo sheekha khuseeyay oo aan haba yaraatee waxba laga dhihin!, sida suaashii ahayd jihaadkan aad aadka ugu ololayso ma ka qayb gashay waligaa? Maxaadse uga qayb gali wayday oo cudurdaar kuu ah?, iyo mawqifka aad ku gaalaysiisay jamaacada ictisaam, waa mawqifkii aad horay u qabi jirtaye, xukumkaagu waagaas muxuu ahaa? Ma gaalbaad ahayd mise mulxid ama cilmaani? Iyo su'aal macnaheedu ahaa: waxaad meela badan ku sheegtay inay kenya cadaw xarbi ah tahay, hantideedana la dhaco, nabadbaadna kula degantahay, bal maxay tahay sirta arintaa ku jirta, mase la arkay dab iyo baasiin aan isgubin?!

Sidoo kale wuxuu sheekhu qoraalka ka soo buuxiyay nuquul tirabadan oo aan isleeyahay malaha wax la isku haystaba ma aha, mawduuca sheekha la waydiiyayna cilaqa lama laha, si kastaba ha ahaatee intani waa hordhac kooban faahfaahinteeda iyo su'aala kale oo ka dhashay qoraalka sh xasaanna dib ayaan ka soo gudbin doonaa inshaa allaah.

Waxaa kale oo aan soo gudbin doonaa in sha alaahu su,aalihii hore oo afsoomaali ah, dala baad badan oo arinkaa ku saabsan oo ii yimid dartii, ilaahayna waxaan ka baryayaa inuu xaq xaq ahaan noo tuso nana waafajiyo raacistiisa, baadilkana baadil ahaan noo tuso nana waafajiyo ka dheeraanshihiisa, aamiin aamiin aamiin.

Waxaa qoray: Sheekh c/raxmaan sh. c/laahi (madani)

21/8/1433